

SOMALI VOICE OF NEW ERA, PROGRAM NO 1062
THRU THE BIBLE SERIES
THE BOOK OF AMOS CHAPTER 9:1-14

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub. Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay kitaabkii Caamoos oo ahaa nin Ilaah farriin ugu soo dhiibay boqortooyadii woqooyi xilli ay ku baraareen hawlahooda, laakiin haddana ay Ilaah ka dheeraadeen.

Caamoos ma ahayn nin la mid ah culimadii waxbaratay ee wakhtigiisa, wuxuuse ahaa nin uu ka dhex shaqaynayno Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah. Mar uu la hadlayey Dadka reer binu Israa'iil ayaa nebigu wuxuu iyaga garansiinayaa waxa ku soo socda oo ah in magaalada la burburin doono. Wuxuuse u sii sheegayaa in dembiyadooda aawadood Ilaah burburin doono magaalada Beytal. Intiise aan burburku ku dhicin qaranka ayaa waxaa dadkii

lagu wargelinayaa inay Ilaah u soo leexdaan si bal wax un uga badbaadaan. Waxyaabaha nebigu kula hadlayo reer binu Israa'iil waa waxyaabo caam ah oo khuseeya qaran waliba.

Wuxuuna leeyahay, sida ku qoran kitaabkii Caamoos 5:14-15, waxaana nebiga uu leeyahay, iyadoo Ruuxa Qoduuska ahi ka dul hadlayo, **"Wanaagga doondoona, sharkase ha doondoona, aad noolaataane, oo sidaasuu Rabbiga ah Ilaaha Ciidammadu idiinla jiri doonaa sidaad u tidhaahdeen. Sharka nebcaada, oo wanaagga jeclaada, oo caddaalad iridda ku sameeya, waayo, waxaa suurtoowda in Rabbiga ah Ilaaha ciidammadu uu u roonaado kuwa reer Yuusuf ka hadhay."**

SONG: REEL-----CUT-----

Markii noogu dambaysay waxay inoo joogtay dhammaadka cutubkii 8aad ee kitaabkii nebi Caamoos, waxaanan soo barannay waxyaabo badan oo khuseeya sida Ilaah xukun uu ugu rido qarankii aan eegin maslaxadda dadkiisa dan yarta ah. Waxaanan reer binu Israa'iil ku dhacay xukun aad iyo aad u xanuun badan, oo waxaa lagu yiri, "Gabayadiinnu waxay idiin noqon doonaan baroorasho," waxaa kaloo lagu yiri, "Waxaad warwareegi doontaan bad-ilaa-ka bad, mana heli doontaan Hadallada Ilaah.:

Haddaba haddaannu cutubkii 8aad intaas ku soo ekayno, ayaan waxaan idiin billaabi doonnaa:

CUTUBKA 9AAD EE KITAABKA

NEBI CAAMOOS

Cutubkan wuxuu u dambeeyaa ama uu soo gunaanadayaa farriintii xukunka ahayd ee nebi Caamoos uu siiyey dadka Israa'iil. Dabadeed nebi Caamoos wuxuu eegayaa mustaqbalka ugu dambeeya, wuxuuna dadka siinayaa khayrka iyo barakada

imaanaysa markii Ilaah dadkiisa uu ku soo celiyo dhulka Israa'iil. Mawduuca ugu horreeya ee cutubkan 9aad waxaa weeye tusniintii nebigu ku arkay sida uu u kala eryi doono dadka dunida. Haddaan horey idiinku sii wadno dhegaystayaal, oo aan idiin bilowno meeriska cutubka 9aad, ayaannu imminka idiin akhriyeynaa aayadda laad ee cutubka 9aad, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan soo socota:

"Waxaan arkay Sayidka oo ag taagan meesha allabbariga, oo wuxuu yidhi, Fayaaradaha garaac ilaa meelahooda sare gariiraan, oo dadka oo dhan madaxooda ku wada jejebi, oo intii ka hadhana seef baan ku layn doonaa. Midkoodna ma carari doono, midkoodna ma baxsan doono."

Waxaa haddaba taas ay sharraxaad ka bixinaysaa reer Ashuur. Markaa macbudka ama meesha allabbariga ee halkan laynoogu sheegay maahan kii nebi Sulaymaan uu ka dhisay magaalada Yeruusaalem, laakiin waa meelo allabbari oo ay u samaysteen macbudkii Baal ee ku yaallay Samaariya. Waxaan arkay baaba'a macbudkii ku yaallay magaalada Samaariya. Haddaan turjumada aayadda kowaad ee cutubka 9aad idiin sii wadno ayaa nebigu uu leeyahay, **"Fayaaradaha garaac ilaa meelahooda sare gariiraan, oo dadka oo dhan madaxooda ku wada jejebi."**

Haddaba maalinta dagaalka ama belaayada dadku waxay ku soo carari doonaan macbudyadooda, laakiin macbudyadaasi waa la baabi'in doonaa oo kuwo badan ayaa lagu dhex halligi doonaa. Waxaana Rabbigu leeyahay, **"Oo intii ka hartayna seef baan ku layn doonaa. Midkoodna ma carari doono, oo midkoodna ma baxsan doono."** Mid waliba oo magaalada ka baxsada isagoo nool, waxaa loo

wadan doonaa maxaabiis ahaan. Haddaan markaasi dhegaystayaal cutubka 9aad, oo ah cutubka ugu dambeeya ee kitaabkii nebi Caamoos horey idiinku sii wadno ayaannu idiin akhriyeynaa aayadda 2aad, waxaana Qorniinka qoduuska ahi leeyahay sidatan soo socota:

"Oo xataa hadday hoos u godaan ilaa she'ool, gacantaydaa halkaas ka soo saari doonta, oo xataa hadday samada fuulaan anigaa ka soo dejin doona halkaasna."

Waxaa Rabbigu uu leeyahay xitaa dhimashadana kuma baxsan doonaan oo waa inay ciqaab arkaan. Laba waxyaabood baa qalbiga kan sharka leh dhibaato u keena.

(1) Maalmaheenna dadkii waxaa laga qabsaday xagga maskaxda ama maanka, sidaasoo ay tahay waxaa naxdinta kuwa sharka ah ay ka timaaddaa garashadooda ah in Ilaah meel waliba uu joogo saacad walba.

(2) iyo in Ilaah aanu isbeddelin. Waxaannu garanaynaa in Masiixu isku mid yahay shalay, iyo maant iyo weligiis.

Labadaasi waxyaabood waa run, oo waxay ka nixiyaan kan sharka leh maskaxdiida. Markii aad eegto qofka Ilaah ka cabsada, waxaa ka farxinaya in Ilaah uu nool yahay oo uu meel walba joogo, iyo in Ilaah aanu deyrinin isaga. Ciise Masiix ayaa xertiisa ku yiri, **"Idinkama tegi doono idinmana deyrin doono."** Masiixu marnaba kaa tegi maayo, markiise aad eegto kuwa aan rumaysadka lahayn, waxaa naxdin ku ah xaadirnimada Ilaah. Dad badan ayaa is-dila iyadoo ay ugu wacan tahay in ciqaabta Ilaah ee ku soo socota ee ah ciqaabta Ilaah uga aarsanayo ay ka cararaan.

Ilaah imminka wuxuu leeyahay, **"Xitaa**

dhimashadana kagama baxsan doonaan ciqaabta."

Addoonkii Rabbiga ee nebi Daa'uud ahaa, ayaa isna wuxuu leeyahay, sida ku qoran Sabuurka 139:7-8, waxaana qoran sidatan:

"Bal xaggee baan Ruuxaaga ka tagaa, Xaggee baanse wejigaaga uga cararaa? Haddaan samada koro, halkaasaad joogtaa. Haddaan sariirtayda she'ool dhex dhigtana, bal eeg halkaasna waad joogtaa."

Markaa meel Ilaah looga baxsanayo ma lahan, kan xumaan falaha ahina ma baxsan doono. Ilaah garashadiisa kuma salaysna waxa uu akhriyey, Ilaah garashadiisu waxay ka madaxbannaan tahay waxyaalaha dadku ay muujiyaan. Ilaah bil-xaqiiqa wax waliba wuu sii og yahay, oo nin Ilaah wax u sheegi kara ma lahan, ha ahaado Ditoor ama Sayntiiste e. Ilaah weligii isma beddelo, iyadoo ay ugu wacan tahay warbixinno ku soo kordhay, ama ay dad ku biiriyeen.

Waxaa Qorniinku uu leeyahay, **"Ciise Masiix waa isku mid shalay, iyo maanta iyo weligiiba."**

Markaa qofka Ilaah taasi aad buu ugu riyaaqaa, oo isla kii Galalii joogi jiray, ayaa haatan dadka la jooga oo la socda. Waxaannu weli horey idiinku sii wadaynaa kitaabka Caamos 9:3, waxaana Qorniinku uu leeyahay sidatan:

"Oo xataa hadday ku dhuuntaan Buur Karmel dhaladeeda anigaa halkaas ka baadhi doona oo ka soo bixin doona, oo xataa hadday badda gunteeda iiga dhuntaan, halkaasna waan ka amri doonaa mas, oo isna wuu qaniini doonaa."

Wuxuu Rabbigu leeyahay, **"..xita hadday Buur Karmel dhaladeeda iiga dhuuntaan, anigaa halkaas ka baadhid oona oo ka soo bixin doona."** Meel ay ku baxsan doonaan ma leh, xita badda gunteeda.

Hadaan meeriska halkii idiinka sii wadno, ayaa aayadda 4aadi leedahay sidatan:

"Oo xataa hadday cadaawayaashooda maxaabiis ahaan u hor socdaan, halkaasna seef baan ka amri doonaa, iyana way layn doontaa, oo waxaan indhahayga iyaga ugu taagi doonaan inaan belaayo ku sameeyo oo aanan wanaag u samayn."

Waxaa kaloo Rabbigu dembiileyaashii uu ku leeyahay, **"Oo xataa hadday cadaawayaashooda maxaabiis ahaan u hor socdaan, xitaa ma baxsan doonaan, oo qaantii dembiyadooda waa inay bixiyaan..."** Kuwa sharka leh waa khasab inay ka welwelaan mustaqbalka, waayo meel ay ku baxsadaan ma haystaan. Kan isku daya inuu is-dilo, si dhibka uu uga baxsado awgeed, wuxuu isgelinayaa baxar ka sii weyn kii hore markuu Ilaah ka hor muuqdo.

Waxay la mid tahay sida nin dhimbil dab ah ku istaagay oo hog weyn oo dab ka qaxmayo ama foorno weyn isku tuuray dabadeed. Weli waxaan horey idiinku sii wadnaa meeriska cutubka 9aad, waxaanan haatan idiin akhriyeynaa aayadda 5aad, waxaana qoran sidatan:

"Sayidka Rabbiga ciidammada ahu waa kan dhulka taabta oo dhulkuna wuu dhalaalaa, oo kuwa deggan oo dhammuna way wada barooran doonaan, oo dhammaantiis wuxuu u kici doonaa sida Webiga, dabadeedna wuxuu u degi doonaa sida Webiga Masar."

Nin waliba oo dhulka Israa'iil booqda wuu garanayaa in dhulka Israa'iil aanu ahayn dhul caano iyo malab la barwaaqaysan maanta. Dhulku waa oomane, oo weliba biyaha caadiga ah ee la cabo, aad iyo aad bay ugu yar yihiin. Dhulkaasi ma ahan haatan kii hore ee caanaha iyo malabka

la barwaaqaysnaa. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka 9aad, ayaa waxaa Qorniinka uu leeyahay, sida aayadda 6aad ku qoran, sidatan:

"Waa isaga kan qolladihiisa sare samada ka dhistay, oo hoygiisa hoose ee isku qabtana dhulka ku aasaasay, oo intuu biyaha badda u yeedha dhulka korkiisa ku daadiya, magiciisuna waa Rabbi."

Haddaba si qurux badan ayuu nebi Caamoos u xusuusinayaa dadkiisa in Ilaah Qaadir uu yahay, mana ahan inuu meel waliba isku wakhti joogo oo keliya, balse waa Qaadir. Waana Isaga kan sameeyey wax waliba ee dunidan yaalla. Isagaa Qorraxda, Dayaxa iyo meereeyayaashaba iyo xiddigahaba abuuray, oo carshiga ama Koonka oo dhammuna Isaga ayuu Amarka ka qaataa. Isaga ayaa shurucdooda iyo xisaabaadkooda dejiyey, balse dadka oo ah abuuris aan xoog badnayn, ayaa Ilaah ku fallaagowday oo waxay diiddan yihiin Qaadirnimadiisa. Wuxuu nebi Caamoos leeyahay,

"...miyaad kala baxsan kartaan Ilaah dembiyadiina?" Imminka waxaa aayaddan soo socota ku qoran warbixin cajiib ah, marka loo eego warbixinnada kale ee kitaabka, wuxuuna nebigu leeyahay sida ku qoran kitaabka Caamoos 9:7, waxaana qoran sidatan:

"Dadka Israa'iilow, sow aniga iilama mid ahidin sida reer Itoobiya? Ayaa Rabbigu leeyahay. Sow anigu reer binu Israa'iil kama soo bixin dalkii Masar? Reer Falastiinna sow kama soo bixin Kaftoor, reer Suuriyana sow kama soo bixin Qiir?"

Haddaba marka uu Ilaah doonayo inuu iyaga u sheego sida uu u jecel yahay, ayuu wuxuu ku yiri

ama leeyahay: **"Dadka Israa'iilow sow aniga iilama mid ihidin sida reer Itoobiya, ayaa Rabbigu leeyahay."** Haddaba rag qubaro ah ayaa waxay daraasaad ku sameeyeen Itoobiya, markii Musaliini uu soo faragaliyey dhulka Itoobiya sannadku markuu ahaa 1935kii. Waxaanay daraasaad ku sameeyeen waxyiyaada khuseeya Itoobiya.

Waxaa haddaba la ogaaday in Khubaradu ay la tacajabeen inay ogaadeen in Itoobiya ay ku jirto qorshayaasha Ilaah ee mustaqbalka. Waa qaran dadka ula muuqan kara, kuwo aan macno lahayn oo Sabool ah, balse si kastoo qoomiyado badan oo dunid ah u liidaan Itoobiya, haddana waxay ku jirtaa qorshayaasha Ilaah, oo Ilaah ahmiyad sare ayey Itoobiya u leedahay. Weli waxaannu ku jirnaa meeriska cutubka 8aad ee kitaabkii nebi Caamoos aayadda 8aad, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

"Bal eega Sayidka Rabbig ah indhihiisu waxay fiiriyaan Boqortooyadii dembi badan, oo dhulkaan ka baabi'in doonaa, laakiinse reer Yacquub ma aan wada baabi'in doono, ayaa Rabbigu leeyahay."

Waxaa Ilaah uu leeyahay, Reer Yacquub ma aan wada baabi'in doono. Marka uu sidaas leeyahay, wuxuu u dhaaranayaa boqortooyadii reer Wqooyiga ahayd. Haddaba, dadka qaarkii bay la tahay in reer binu Israa'iil ay kala lumeen, balse taasii runta kuma salaysna. Reer binu Israa'iil dhammaantood, midi kama magna oo way isku soo urureen, wanay is-heleen, mana jirto qoomiyad ka mid ah reer binu Israa'iil oo la la' yahay ama ku maqan dhulka cirifiyadiisa. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka 9aad, ayaannu imminka idiin akhriyeynaa aayadda 10aad, waxaana qoran sidatan:

"Dembilayaasha dadkayga oo dhan oo leh, Belaayo na soo gaadhi mayso nana heli mayso, dhammaantood seef bay ku dhiman doonaan."

Maxaa haddaba Ilaah uu ka leeyahay dembiileyaasha? Dembiileyaasha way dhiman doonaan, oo weliba wuxuu xukun saarayaa shakhsiyaada aan Isaga u soo leexan. Waxaa la mid ah kuwa jooga wehelnimadeena, oo iyaga oo dhaniba badbaadi maayaan. Waxaana ugu wacan inaanay dhab ka ahayn rumaysadka ay sheeganayaan ee Masiixa.

Rasuul Bawlso ayaa isna wuxuu leeyahay, isagoo ka hadlaya kuwa badbaadaya iyo kuwa aan badbaadaynin ee reer binu Israa'iil, taasoo sawir ka bixinaysa kiniisaddayada maanta, sida ku qoran warqaddiisii reer Rooma 9:6. Waxaana Qorniinka godduuska ahi leeyahay sidatan:

"...laakiin mana ahan sida iyadoo hadalkii Ilaah dhacay, waayo kuwa Israa'iil ka dhashay, kulligood reer binu Israa'iil ma wada aha."

Waxaa haddaba jira laba qaybood oo Israa'iiliyiin ah, waana kuwa aan dhibku soo gaari doonin, iyo kuwa belaayadu ay ku soo socoto ee dembiiley-yaasha ah, waana kuwa Ilaah ku fallaagoobay ee uu haatan uu nebi Caamoos la hadlayo.

Waxaannu haatan soo gaarnay maaddada labaad ee cutubkan 9aad, waxaana weeye saaxiib tusniinta khusaysa in Ilaah dunida uu soo celin doono. Waxaannu haddaba soo gaarnay tusniintii ugu dambaysay ee nebi Caamoos, waxaanay khusaysaa sida Ilaah mar kale uu isugu uruurinayo boqortooyada Masiixa. Nebi Caamoos wuxuu meel fog ka arkay ciqaabta kulul ee haysata reer binu Israa'iil iyo dadka dunida iyo sida

dadkiisa ay u kala firdhi doonaan. Wuxuu kaloo arkay maalmaha ka dambeeya wakhtiga dhibka weyn dunida uu imaanayo. Weli meeriska cutubka 9aad ayeynu ku jirnaaye, waxaannu idiin akhriyeynaa haatan aayadda 11aad, waxaana qoran sidatan:

"Wakhtigaas waxaan sare kicin doonaa taambuuggii Daa'uud oo dhacay, waanan awdi doonaa daldaloolkiisa, oo jajabkiisana waan sare kicin doonaa, oo waxaan u dhisi doonaa sidii waagii hore."

Marka uu leeyahay 'Maalintaas', wuxuu ka hadlayaa maalmaha ugu dambaysnta ee Israa'iil. Waana wakhtiga Ilaah uu sarakicin doono taambuuggii nebi Daa'uud ee dhacay. **"Waanan awdi doonaa daldaloolkiisa, oo jajabkiisana waan sara kicin doonaa, ayuu leeyahay Ilaah."**

Markii la raadraaco waxa nebigu sii sheegay ayey ku soo wada aroorayaan Kitaabka Falimaha Rasuullada 15:13-18. Waxaana Qorniinka Qodduuska ahu leeyahay sidatan:

"Kolkay aamuseen dabadeed ayaa Yacquub u jawaabay, isagoo leh, Walaalayaalow, I dhegaysta, Simecoon waa ka warramay sidii Ilaah markii ugu horraysay u soo booqday dadka aan Yuhuudda ahayn inuu dad uga soo bixiyo iyaga magiciisa aawadiis, Taasuna waxay raacsan tahay hadalladii nebiyada; siday ugu qoran tahay, Waxyaalahaas dabddeed waan soo noqon doonaa, Oo mar labaad ayaand hisi doonaa taambuuggii Daa'uud oo dhacay, Oo mar labaad ayaan dhisi doonaa jajabkiisa, Waanan taagi donaa; si nimankii hadhay ay Rabbiga u doondoonaan, Iyo quruumaha oo dhan oo magacayga loogu yeedhi, Taas waxaa yidhi Rabbiga waxyaalahaas muujiyey tan iyo bilowgii dunida."

Haddaba, weli maanta Ilaah wuxuu dadka ugu yeerayaa magaciisa. Dabadeedna wuxuu sarakicinayaa taambuuggi dhacay ee nebi Daa'uud. Marka dhanka kale laga eegana nebigu wuxuu ka hadlayaa wakhtiga Sabaanka, oo ah wakhtiga Masiixu uu boqortooyadiisa ka taagi doono dunida. Waana maalin weyn oo aan weli imaanin, oo mustaqabka ah. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka 9aad ayaannu horey u sii ambaqaadaynaa aayadda 12aad, waxaana Qorniinku uu leeyahay sidatan:

"Inay iyagu dhaxlaan kuwii hadhay ee reer Edom iyo quruumaha magacayga loogu yeedho oo dhan, ayaa Rabbiga waxan sameeya leeyahay."

Waxaa haddaba halkan laynoogu sheegayaa in quruumo badan ay gelayaan boqortooyada Masiixa. Ma ahan oo kaliya hal qoomiyad, laakiin waa qoomiyado aad iyo aad u fara badan. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka 9aad, ayaannu imminka idiin akhriyeynaa aayadda 13aad, waxaana qoran sidatan:

"Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal eega, waxaa iman doona wakhti kan beerta falaa uu soo gaadhi doono kan gooya, oo kan canabka ku tuntaana wuxuu soo gaadhi doonaa kan iniinaha beera, oo buurahana waxaa ka soo daadan doona khamri macaan, oo kuraha oo dhammuna way wada dhalaali doonaan."

Haddaba sidaan horeyba idiinku soo sheegnay, markii dadka Israa'iil ay barako helaan, ayaa dhulkuna barakoobayaa, oo wuxuu soo saarayaa mirihiisa, xilligiisa roobkana waayi maayo. Dadka iyo dhulkuna way is-leeyihiin, Ilaahna wuxuu caddaynayaa markii dadka dhulka ku soo noqdaan, waa reer binu Israa'iile, ayaa dhulka

sidiisii hore uu noqonayaa. Oo wuxuu ahaanayaa dhul caano io malab la barwaaqaysan, wuxuuna ka duwanaanayaa kan imminka biyaha la' oo aan waxba doorin lama-degaanka dunida.

Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka 9aad, ayaannu dhegaystayaal waxaannu horey idiinku sii ambaqaadaynaa kitaabkii nebi Caamoos, aayadda 14aad, waxaana Qorniinku uu leeyahay sidatan:

"Oo anigu waxaan soo celin doonaa maxaabiistii dadkayga Israa'iil, oo iyana way dhisi doonaan magaaloooyinkii baabba'ay, wayna degi doonaan, oo beercanabyo way beeran doonaan, khamrigoodana way cabbi doonaan, oo weliba waxay samaysan doonaan beero, oo midhahooda way cuni doonaan."

Haddaba dhegaystayaal Ilaah wuxuu reer binu Israa'iil ku soo celin doonaa dhulkoodii, welibana uma kala qaybsanaan doonaan sidii wakhtigii nebi Caamoos, markaasoo ay u kala qaybsanaan jireen reer woqooyi iyo reer koofur. Waxay noqonayaan imminka, ayuu leeyahay nebiga hal qaran. Dhammaantood meelaha ay kala joogaan waa la garanayaa. Waxayna sugayaan wakhtiga Rabbigu uu amro in reer binu Israa'iil ay ku soo noqdaan dhulkoodii, iyo in Ilaah dhulka uu barakadeeyo.

SONG: REEL-----CUT-----

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe **(hadahan oo kale)** isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan

somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin.